**Warbixinta Sannadlaha ah ee Hagaha Iskudhafan ODE ee  2023–2024**
Noofambar 2024

**Waxyaabaha ku saabsan Warbixinta**

- Warbixinta sannadlaha ah ee Hagaha Iskudhafan 2023-2024 wuxuu ku aadanyahay ODE Noofambar 30, 2024.
- Natiijada iyo istiraatiijiyadda kujirta [Qorshaheena Hagaha Iskudhafan ee 2023-2024] waxaa si toos ah loogala soo dhex baxay muhiimadaha kujira *Forward Together.*
- Jawaabtaan waxaa la qoray ayada oo lagu salaynayo istiraatiijiyadaha PPS iyo natiijooyinka guud mana ahan kaliya Qorshaha Hagaha ee Iskudhafan, kaasoo u dhigma qiyaastii 2-3% miisaaniyadda PPS.
- Warbixinta sannadlaha ah waa in lasoo galiyaa websaytkeena, lagu soo bandhigaa kulanka Guddiga ee furan, waxaana ansixiya Guddiga.

**Su'aalaha Warbixinta Sannadlaha ah**

**1. Inta aad dib u eegayso waxyaabaha horumarka aad ka samaynayso 2023-2024/ jawaabaha felcelinta ah ee guud iyo ka tarjumidda meelmarinta qorshaha, sidee u aragtaa in in horumarkaagu uga qaybqaadanayo Natiijooyinka iyo Istiraatiijiyadaha kujira qorshahaaga iyo Yoolalkaaga Horumarka Cabiran (LPGT)/Cabirrada Khiyaariga ah ee Maxaliga ah (LOM)?  Ka hadal ugu yaraan hal Natiijo oo aad ka aragto in horumar laga gaaray meelmarinteeda.**

Kobac tartiib ah oo ku saabsan ELA iyo Xisaabta: Saddex sanno oo isku xigta, degmada waxaa kajiray kobac tartiib ah oo ku saabsan labadaba Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta, ayada oo dhammaanba ardayda dhigata fasalada 3-8 ay horumar ka samaynayaan ELA sidoo kalena horumar ka samaynayaan Xisaabta. Arintaani waxay ka tarjumaysaa adkaysiga ardayda iyo dadaalka macalimiintu ugu jiraan abuurista jawi waxbarasho oo wanaagsan. Ardayda naafada ah waxay sidoo kale muujiyeen horumar dhanka guulaha tacliinta ah, si lamid ah ardayda Madowga ah iyo kuwa Latinx ka ah ee dhigta fasalka 3aad ee akhriska iyo fasalka 5aad ee xisaabta. Ayada oo horumarkaanu yahay mid dhiirigalin leh, waxaan wali wajahaynaa dhibaatooyin waana inaan dardargalinaa waxbarashada ardayda yoolka noo ah, oo ay kujiraan kuwa Madow, Maariinka ah, iyo kuwa asalka ah. Beaumont Middle School iyo Sitton Elementary School, khaasatan, ayaa sameeyay horumar laba jiifar ah oo ay ka sameeyeen labadaba Xisaabta iyo ELA, taasoo keenaysa dhinacyo horumar ah. Guulahaanu waxay ka tarjumayaan dadaalka degmadu ku bixinayso horumarinta natiijooyinka ardaydu keenayaan, taageerista macalimiinta, iyo u qoondaynta ilaha ay u baahanyihiin.

Dadaalka Tababarka Macalimiinta iyo Taageerada: Saddexdii sanno ee la soo dhaafay, degmadu waxay diyaarinaysay tababrna siinaysay macalimiinta ayada oo ku tababaraysay sida loo isticmaalo agabka waxbarashada ee tayada sare. Waxaan qaadanay manhajyo wanaagsan oo xisaabta iyo ELA ah. Degmadu waxay sidoo kale diiradda saaraysaa cilmiga wax akhriska, ayada oo xaqiijinaysa tayada manhajka sidoo kalena isticmaalaysa xog si ay horumar u keento. Waxaan sidoo kale maalagalin weyn ku samaynay inaan helno tababare xagga waxbarashada ah oo jooga dhisme walba si uu macalimiinta u siiyo kaalmo diyaarsan.

Taageerada Loogu tala galay Ardayda: Degmadu waxay sii wadday inay muhiimadda siiso adeegyada ardayda la dhibtoonaysa una baahan taageerada dheeraadka ah. Arintaan waxaa kamid ah maalgashiga balaaran ee ilaha sida adeegyada waxbarashada, tacliinta tayada sare, barnaamiyada

dugsiga ee xagaaga, agabyada manhajka, iyo nidaamka “WIN” (Waxa Aan u Baahanahay inaan Ogaado).

Diiradda saarista Badqabka iyo Ammaanka dhanka Jirka iyo Dareenkaba ah ee Ardayga: Marka laga tago taageerada tacliinta, degmadu waxay sidoo kale diiradda saartay xaqiijinta in ardaydeenu, khaasatan kuwa la kulmay dhibaatada ama uurkutaalada, ay helaan jawi ammaan ah iyo kaalmo dhammaystiran. Waxaan sii wadaynaa inaan ardayda iyo qoysaska kala shaqayno dib u naqshadaynta goobaha, xoojinta kaalmada badqabka, iyo kala qaybqaadashada bulshada kaalmada dhamaystiran ee badqabka jirka iyo kan dareenka.

**2A. Ka hadal ugu yaraan hal Natiijo oo aad ka aragto in caqabado ama dhibaatooyin kajiraan meelmarinteeda.**

Inkasta oo uu jiro horumar dhiirigalin leh, haddana arday fara badan ayaan wali gaarin halkii ay u baahnaayeen iany gaaraan. Waa inaan dardargalinaa waxbarashada ardayda muhiimka ah, khaasatan kuwa Madow, Maariinka ah, iyo kuwa Asalka ah. Firaaq dhanka guusha ah oo soo laalaabanaya ayaa kajira guud ahaanba isirada, qolada, waxbarashada gaarka ah, iyo xaaladaha ardayda barata Ingiriisiga. Firaaqaanu waa kuwo soojireen ah mana ahan wax la aqbali karo, ayaga oo ka hor imaanaya waxa aan aaminsannahay oo ah in ardayda oo dhami guulaysan karaan. Waxaa naga go’an tayada waxbarashada waana inaan wax fiican u qabanaa ardaydeena.

Si caqbadahaan wax looga qabto, waxaan baaraynaa waxyaabaha sababaya waxaana soo saraynaa waxa ay salka ku hayaan. Anaga oo wajahayna miisaaniyad $40 milyan ka yar halkii la rabay, kaddib markii $30 milyan la dhimay, waxaan dib u habaynaynaa nidaamka miisaaniyadeena, anaga oo gudaha usii galayna xogta, taxliilinayna qorsheyaasha gaarka ah ee horumarka dugsiga, sidoo kalena xoojinayna ka qaybgalka bulshada ee degmada oo dhan. Qaabkeena xogtu hagayso, tayada ku salaysan waxaa loogu tala galay in lagu xaqiijiyo istiraatiijiyado waxtar badan leh oo la maalgalyo iyo in adeegyadu gaaraan ardayda baahida ugu weyn u qaba.

**2B. Halkee ayaad ka wajahaysa caqabadaha, dhibaatooyinka, ama caqabadda ku ah horey u socoshada Natiijooyinkaaga iyo Istiraatiijiyadahaaga qorshahaaga aad u adeegsan karto taageeradooda?**

Labada caqabadood ee ugu weynaa sannadkii lasoo dhaafay waxay ahaayeen shaqo joojinta macalimiinta iyo soo gabagabaynta maalgalintii ESSER III. Inkasta oo ay caqabadahaanu jireen, PPS waxay kusii dadaalaysay gaarista natiijooyinka iyo istiraatiijiyadaha ku cad Qorshaha Istiraatiijiyadda PPS, kaasoo waafaqsan qorshaha IGG. Si kastaba ha ahaatee, waxaan wajahaynaa $40 milyan oo lacag dhimman ah, kadib markii miisaamiyadda laga dhimay $30 milyan sannadkii hore, taasoo wadarta guud ee la dhimay ka dhigaysa $70 milyan labadii sano ee lasoo dhaafay. Waxaan samaynaynaa qiimaynta baahiyaha dhammaystiran waxaana gaaraynaa go’aano adag si ana u meelmarino sare u qaadista kharashaadka iyo yaraynta maalgalinta. Istiraatiijiyadaheena iyo horumarkeenu waxay lagama maarmaan u yihiin sii socoshada wax ka qabashada gaabiska joogtada ah ee kajira kooxaha ardaydeena muhiimka ah, qorsheheenuna waa in aad loo yareeyo ayada oo ay sabab u yihiin maalgalintii oo yaraatay iyo kharashkii oo kordhay.

Waa lagama maarmaan in ardayda oo dhan ay ka qaybqaataan wadahadalka ka dhacaya heer gobol iyo heer degmo si loo helo maalgalin iyo ilaha si kobaceenu u noqdo mid waaraya. Waa inaan qaadnaa

talaabo kasta oo suurtagal ah si aan u yarayno gaabiska sannadka soo socda aanna u maalgashano aradydeena iyo macalimiinteena.

Maalgalinta dheeraadka ah ee gobolku waxay bixin doontaa taageero muhiim ah si maalgashiyada muhiimka ah ay u waaraan, sida horumarka macalinka xirfadlaha ah, ayada oo la meelmarinayo Habka Waxbarashada PPS, sare u qaadista wax akhriska, iyo bixinta adeegyo qorshaysan oo ku slaaysan Nidaamka Qaybaha badan ee Taageerada ah (MTSS). Sidoo kale waa inaan sare u qaadnaa taageerooyinkeena guud ee badqabka iyo ammaanka jireed iyo maskaxeed ee ardaydeena iyo qoysaskeena ay samaaysay uurkutaalada iyo dhibaatada bulshadeena dhexdeeda ah.